Oregon Health Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

# Garoojooyinka xoojinta, garoojada saddexaad ee loogu talagalay dadka difaacoodu daciifay

***(La cusboonaysiiyey 01-11-2022)***

Si aad u heshid macluumaadkii ugu dambeeyay, booqo https://govstatus.egov.com/or-oha-booster-covid-19-vaccine

## Garoojooyinka xoojinta ee lagu taliyay

Dhammaan saddexda tallaal ee COVID-19 ayaa sidoo kale loo heli karaa garoojo xoojin ahaan oo loogu talagalay dadka sida buuxda u tallaalan ee ka midka ah kooxaha hoos ku qoran. Dadku waxay dooran karaan nooca tallaalka ay u qaadanayaan xoojin ahaan waxayna ka heli karaan garoojo xoojin ah inta badan goobaha bixiya tallaalada COVID-19.

| **Tallaalka** | **Waxaa lagula taliyay kooxaha dadka ee soo socda** | **Waqtiga** |
|---|---|---|
| **Pfizer**<br><br>Garoojada koowaad 0.3 mL<br>Garoojada labaad 0.3 mL<br>Garoojada xoojinta 0.3 mL | • **12** sano jir iyo ka weyn<br>• Garoojo xoojin ah ayaa haatan lagula talinayaa inay qaataan dadka jira **12** iyo ka weynkuwaasi oo difaacoodu daciifay oo qaatay garoojo saddexaad. | Garoojada xoojinta ugu yaraan shan bilood kadib garoojada labaad |
| **Moderna**<br><br>Garoojada koowaad 0.5 mL<br>Garoojada labaad 0.5 mL<br>Garoojada xoojinta 0.25 mL | • 18 sano jir iyo ka weyn<br>• Garoojo xoojin ah ayaa haatan lagula talinayaa inay qaataan dadka jira 18 iyo ka weyn kuwaasi oo difaacoodu daciifay oo qaatay garoojo saddexaad. | Garoojada xoojinta ugu yaraan shan bilood kadib garoojada labaad |
| **Johnson & Johnson**<br><br>Garoojada koowaad 0.5 mL | • 18 sano jir iyo ka weyn<br>• Garoojo xoojin ah ayaa haatan lagula talinayaa inay qaataan dadka jira 18 iyo | Garoojada xoojinta ayaa lagu taliyay ugu yaraan 2 bilood |

| | | |
|---|---|---|
| Garoojada xoojinta 0.5 mL | ka weyn kuwaasi oo difaacoodu daciifay ee qaatay tallaalka Johnson & Johnson. | kadib garoojada koowaad |

## Garoojada saddexaad ee loogu talagalay dadka difaacoodu daciifay

Hadduu difaacaagu daciifay, waa inaad qaadataa garoojada saddexaad ee tallaalka mRNA ugu yaraan 28 maalmood kadib garoojada labaad.

| Tallaalka | Waxaa lagula taliyay kooxaha dadka ee soo socda | Waqtiga |
|---|---|---|
| **Pfizer**<br>**12+**<br>Garoojada koowaad 0.3 mL<br>Garoojada labaad 0.3 mL<br>Garoojada saddexaad 0.3 mL<br><br>Garoojada daawaynta carruurta ee da'doodu tahay 5-11 sano jiro<br>Garoojada koowaad 0.2 mL<br>Garoojada labaad 0.2 mL<br>Garoojada saddexaad 0.2 mL | Dadka si dhexdhexaad ah ilaa daran difaacoodu u daciifay kuwaasoo si gaar ah ugu nugul COVID-19. | Ugu yaraan 28 maalmood kadib garoojada labaad |
| **Moderna**<br>Garoojada koowaad 0.5 mL<br>Garoojada labaad 0.5 mL<br>Garoojada saddexaad 0.5 mL | Dadka si dhexdhexaad ah ilaa daran difaacoodu u daciifay kuwaasoo si gaar ah ugu nugul COVID-19. | Ugu yaraan 28 maalmood kadib garoojada labaad |
| **Johnson & Johnson** | Qof kasta oo qaatay tallaalka Johnson & Johnson waxaa si xooggan loogula talinayaa inuu ka helo garoojada xoojinta ah mid ka mid ah saddexda tallaal ee la oggolyahay labo bilood kadib markii uu qaato garoojadiisa Johnson & Johnson. | MA KHUSEEYSO |

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir

COVID-19 Communications Unit 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.